



Kooxda IDG ee DMCC

120 Emarat Atrium Building, Sheikh Zayed Rd, PO Box 50784, Dubai, UAE

SIYAASADDA KA HORTAGGA TAKRIFALKA GALMO LA XIRIIRA IYO XADGUDUB (PSEA)

Luulyo 2019

NOOCA 1



KOONTAROOKKA NOOCA

| NOOCA | LA SOO SAARAY | MUALIF | WAXAA IN LA SHAACIYO AMRAY |
|-------|---------------|----------|--------------------------------|
| 1 | LUULYO 19 | G WINTER | <i>[Handwritten signature]</i> |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |



TUSMO

| | |
|---|----------|
| TUSMO | 1 |
| SIYAASADDA PSEA | 2 |
| Tixraacyo | 2 |
| 1. Baaxadda | 2 |
| 2. Qaabka IDG ee Kahortagga Takrifal Galmo la Xiriira iyo Xadgudub | 2 |
| 2.1. Bayaanka ICOCA | 2 |
| 3. Shaqaaleyn | 2 |
| 4. Qiimeynta Shaqada | 3 |
| 5. Aadaabta | 3 |
| 6. Tababar | 3 |
| 7. Qiimeynta Halista ee SEA | 3 |
| 8. Maareynta Cabashooyinka iyo Baaritaanka ee SEA | 4 |
| 8.1. Soo Tebinta Xadgudub | 4 |
| 8.2. Maareynta Dhacdo | 4 |
| 8.3. Maareynta Baaritaanka..... | 4 |
| 9. Caawinta Qof Ka Badbaaday | 5 |



SIYAASADDA PSEA

Tixraacyo

- 1) *Ururka Anshaxa ee Caalamiga ah (2019). Tilmaamaha Dadka Bixiya Amniga Gaarka ah ee Kahortagga iyo Wax ka Qabashada Takrifal Galmo la Xiriira iyo Xadgudub.*

1. Baaxadda

Siyaasaddaan waxaa loola jeedaa dhammaan shaqaalaha u shaqeeya IDG – shaqaalaha, dadka u sharraxan shaqooyinka inay qabtaan, qandaraasleyaasha. Intaas waxaa dheer, waajibkeena daryeel wuxuu u adeegaa dhammaan dadka nala jira, ama nala shaqeeya.

Waa muqadas inay xil gaar ahaaneed iska saaraan ka hortagga, ama soo tebinta wixii tusaale ah ee ku saabsan SEA.

2. Qaabka IDG ee Kahortagga Takrifal Galmo la Xiriir iyo Xadgudub

IDG innaba uma dul qaadato qaab un kii uu ahaadaba ee ku saabsan takrifal galmo ama xadgudub (SEA). SEA waa xadgudub ba'an oo ka dhan ah xaquuqul insaanka, waana fal dambiyeed badanaa.

SEA waxaa laga yaabaa inuu ka dhaco marxalad kasta oo IDG ah inta lagu jiro shaqada maalinlaha ah, min shaqaaleysiin ilaa waajibaadka caadiga ah ee qofka markii la shaqaaleysiiyo uu guto. IDG waa natiijada ka dhalata sharuudaha macmiilkeena si loo bixiyo waardiyeyaal rag ah, ragga ayaa ileen shaqadaas aad ugu badane. Dheellitir la'aanta waxaa lagu qeexaa inay tahay halis ka dhex jirta shirkadda waana in ay dusha kala socdaan dhammaan maareeyeyaasha heer kasta leh.

2.1. Bayaanka ICOCA

IDG ka xubin ahaan ka tirsan *Ururka Anshaxa ee Caalamiga ah (ICOCA)* waxay xaqiijinaysaa inay u hoggaansameeyso Baragaraafka 38 ee Anshaxa Caalamiga ah ee loogu tala galay *Dadka Bixiya Amniga Gaarka ah*:

Shirkadaha Saxiixay kama faaiideysan doonaan, umana ogolaan doonaan shaqaalahooda inay galaan ama ka faaiidaan takrifal galmo (oo ay ku jiraan qorsheyaashaa, dhilleysi) iyo xadgudub rabsho ku salaysan jinsi ama dembiyo, ama shirkad gudaheed ha ahaato ama meel ka baxsan sida kufsi, dhibaateyn galmo, iyo wixii kaloo qaab ah oo ah xadgudub galmo oo rabshad ah. Shirkadaha saxiixay waxay doonayaan una baahan doonaan in shaqaalahoodu ay sii ahaadaan kuwo digtoon mar kasta oo ay dhacaan wax la xiriira rabshad galmo la xiriirta ama rabshad galmo la xiriirta iyo markii la ogaado, in loo soo tebiyo dhacdooyinka noocaas ah dhammaantood hay'adaha dawliga ah ee wax ka qaban kara.

3. Shaqaaleyn

IDG Siyaasaddeeda Shaqaaleynta waxay dejisaa macnaha shaqaalaha la qaadanayo lagu qiimeeyo, lagu baaro oo lagu xusho. Tani waxay ku taxaluqdaa shaqaalaha dal iyo dibadba laga shaqaaleysiinayo.





Maadaama ay qeyb ka tahay hannaanka shaqaaleysiinta, dadka wax u shaqaaleysiinaya IDG waa inay maanka ku hayaan mabaadiida ka hortagga ee SEA ayna baaraan murashaxiinta shaqada ee laga yaabo inaysan u hoggaansamin heerarka anshaxa ee la filaayo.

Maareeyayaasha hannaanka shaqaaleysiintu waa inay xaqiijiyaan in nidaamyada iyo koontarooladu meeshii laga rabay ay yihiin si loo xaqiijiyo in asxaan galmo la xiriira aan laga codsan soo codsadeyaasha si shaqo ay u helaan. Waxaa kujira kuwaa shaqaalaha iyo sidoo kale wixii wakiillo ah ama shaqaalaha qaabilsan arrimaha shaqaalaha ee ka imaanaya meelo ka baxsan ururka kuwaasi oo ku lug lahaan kara hannaanka.

Dhammaan shaqaalaha la xusho ee lagu soo xusho si waafaqsan habraacyada waa in lagu wargaliyo Anshaxa IDG oo ay qeyb ka yihiin tilmaameyaasha gaarka ah ee PSEA.

4. Qiimeynta Shaqada

Dhammaan shaqaalaha waxaa la marinayaa qiimeyn ay samaynayaan maareeyayaasha mid waliba u gaarka ah. U hoggaansamidda Xeerka Anshaxa waxay qeyb ka noqotaa qiimeyntaan.

5. Aadaabta

Haddii laga baaqsado in loo hoggaansamo Anshaxa, Siyaasaddaan PSEA waxay ka kooban tahay guuldarro edbin lagu mudan karo taasi oo sababi karta in durba qofka laga joojiyo qandaraaska.

6. Tababar

Shaqaalaha in lagu tababaro PSEA waa qeyb ka mid ah barnaamijka tababarka ee ku soo biiridda shirkadda. Waxaa arrinkaasi ka mid ah ku tababaridda shaqaalaha sida loo soo tebiyo loolana tacaamulo dhacdooyinka SEA ee laga yaabo inay iyagu ka shakiyaan ama goob joog u ahaadaan.

7. Qiimeynta Halista ee SEA

Maareeyayaasha shirkadda u qaabilsan dalka, iyo maareeyayaasha xafiiska ugu weyn, waa inay qiimeynno xilliyeed halista SEA lagu samaynayo ay sameeyaan. Qiimeynta halistu waa inay tixgaliso ugu yaraan:

- Sababaha gaarka ah ee halista ee SEA ee deegaanka shaqada
- Macquulnimada in ay SEA dhici karaan
- Yaa halista ugu badan ku jira
- Tillaabooyinta dhimidda halista
- Tillaabooyinka kormeerka, iyo xilka la iska saarayo tillaabooyinkaa
- Habraacyada maareynta dhacdada
- Sharuudaha taageerada iyo caawimaada ee markii wax dhacaan la adeegsanayo (oo ay ku jiraan laamaha maxalliga ah)





8. Maareynta Cabashooyinka iyo Baaritaanka ee SEA

8.1. Soo Tebinta Xadgudub

Xadgudubyada SEA wali way ka dhex dhici karaan IDG, meelaha aan ka shaqeyno, ama waxay ku dhici karaan mid ka mid ah shaqaalaheena. Haddii dhacdo ay dhacdo, qofku durba waa inuu kusoo wargaliyo meereyihiisa gaarka ah, ama maareeyaha sare ee ugu dhow. Intaasi waxaa dheer:

- Siyaasadda Cabashada ee IDG waxay caddeyneysaa habka shakhsi uu ku soo tebin karo wixii xadgudub ah ee uu dareemayo in loo geystay,
- Siyaasadda IDG ee Sheegidda Wixii Dhacay waxay caddeyneysaa sida shakhsi uu u soo tebin karo wixii xadgudub ah ee uu ka shakiyo ama uu goob joog usoo ahaa, haddii uusan dareemeyn inuu awoodo inuu u sheego dhacdadaas maareeyihiisa gaarka ah.

8.2. Maareynta Dhacdo

Markii la soo tebiyo, maareeyaha sare ee IDG waa inuu hawsha la wareego wax ka qabashadeeda. Waa lagama maarmaan in qaabka ku salaysan qof dhibbane ah la qaato bilowgaba.:

- Mudnaan sii xaquuqda, baahiyaha iyo waxyaabaha uu dhibbanuhu rabo
- Qaddari khusuusiyaadka dhibbanaha iyo baahiyaha qarsoodiga
- Waqti kasta wargali oo wixii soo kordha u sheeg dhibbanaha
- U ogolow dhibbanaha inuu ku siiyo wixii xog ah ee uu haayo

8.3. Maareynta Baaritaanka

Maareeyaha IDG waa inuu sameeyo baaritaan qiyam uu hoggaaminayo, oo waafaqaya waxyaabaha soo socda:

- In waqtigii la doonayay la sameeyo
- Inuu dhammaystiran yahay
- In uusan dhanna u janjeerin
- Inuu qoran yahay
- Inuu badbaado leeyahay

Kooxda waa inuu hoggaamiyo maareeyaha IDG kaasi oo soo magacaabi doona ugu yaraan labo baareyaal. Qof kastoo baare ah waa inuu qaato tababar gaar ah oo SEA ah. Dhammaan baareyaasha waa in loo xaqiijiyo sidii dad la aamini karo oo dhibbanuhu sidaasi xaqiijiyo, uuna awoodo inuu ula shaqeeyo si macno leh.

Dib wax ugu soo tebintooda ganacsiga baareyaasha waa in loola tacaamulo sidii arrin aad dareen u leh aadna qarsoodi u leh waana in un lagu soo tebiyo si ku salaysan 'sidii arrin in la ogaado u baahan'.

Tillaabo edbin ah waa in la qaado kadib markii la soo gabagabeeyo baaritaanka.





9. Caawinta Qof Ka Badbaaday

IDG waxay mudnaan siisaa baahiyaha qofka dhibkaa ka badbaaday. Cawimaad ideylkeed waa in la bixiyo waana in la tixgaliyo waxyaabaha soo socda:

- Cawimaad caafimaad
- Cawimaad maskaxiyan ah
- Caawinta badbaadada
- Cawimaad maaddi ah [alaab iyo waxyaabo kale oo la taaban karo]
- Taageero sharci.

Istaraatiijiyadda cawimaadda ee gaarka ah ee ay tahay inay waafaqdo baahiyaha shakhsiga waa in la dajiyo lana hirgaliyo. Istaraatiijiyadda waa inuu dusha kala socdo maareeyaha sare ee IDG, waxtarkeeda iyo mudnaanteedana waa in qiimeyn lagu sameeyo.

Xaquuqda dhibbanaha waa in la qaddariyo loolana tacaamulo si mar walba sharaf leh.